

Xogta Bukaanka

– Bakteeriyada Kalostariidhiyam

Somaliska

Kaalada guud

Bakteeriyada Kalostariidhiyam waxaa laga heli karaa Mandhicirada, gaar ahaan caruurta yar yar iyo dadka waawayn. Xaaladaha qaarkood Bakteeriyadu waxay soo saari kartaa sun sababi karta shuban. Bakteeriyada Ili ma argtayga ka samaysantaa waxay ku noolaan kartaa agagaarka bukaanka. Inta badan wax astaan ah ma leh waxayna Bakteeritadu ka mid tahay gaska caadiga ah ee Mandhicirka. Shubanka ay keento Bakteeriyada Kalostariidhiyam waxaa inta badan sababa daawooyinka lidka Antibaayootiga marka lala siiyo daawooyin kale ama uu asiibo cudur kale qofka. Antibaayootigu wuxuu yareeyaa cadadka Bakteeriyada "fican" ee ku jirta mandhicirka iyo Bakteeriyada Kalostariidhiyam kaasoo inta badan uuna saamaynin Antibaayootiga caadiga ah oo marka danbe sameeya sun Iyana sababta olol ku yimaada xuubka iyo dhaerreka mandhicirka.

Calaamadaha

Biyobiyo, Ur qadhuun, Saxaro jilicsan, calool xanuun iyo qandho dhax dhaxaad ah. Khatarnimada calaamaduhu way kala duwanaan kartaa.

Baadhtaanada

Waxaa lagaaga baahanyahay in aad keento muunad saxaro ah.

Daawada

Shubanka caadiga ahi wuxuu tagi doonaa marka aad dhamaysato dawada Antibaayootiga adigoon dawo kale qaadan. Marka aad dhamaysato Antibaayootigii laguu qoray. Shubanku wuxuu sababaa in aad fuuqbaxdo, sidaas darteed waa in aad si joogto ah biyaha u cabtaa. Hadii ay dawadaadu damaaanadqaad leedahay dhakhtarkaagu wuxuu kuu qori nooc gaar ah oo Antibaayootig ah kaas oo wax ka taraya lidna ku ah bagteeriyada Kalostariidhiyam

Kala qaadida

Infakshinkan sida caadiga ah waxaa lagu kala qaadaa shubanka. Gaar ahaan Bagteeriyada daawada iska difaacda ee soo raacda saxarada taasoo wasakhayn karta oogada la taabto marka la isticmaalo musquusha, sida fadhiga musquusha, gacanka la jiidoo markaa biyaha la raacinayo, qasabada, gacanka albaabada, IWM. Gacmihi taabta waxyaabahan Iyana waxay sii gudbinayaan Bagteeriyadan. Si ay xanuun u keento, Bakteeriyadani waa in ay gaadho mandhicirka iyada oo sii maraysa afka.

Gacmaha oo si taxadarleh loo nadiifyo waa muhiim. Mar kasta gacmahaaga ku maydh saabuun iyo biyo ka hor marka aad wax cunayso iyo ka dib marka aad musquusha isticmaashoba.

Bakteeriyada Kalostariidhiyam waxay jidhka meel ka baxsan ku noolaan kartaa mudo dheer waxayna goobaha caafimaadka ku keeni kartaa dhibaatooyin. Xubnahaa qoysku waa in ay ka taxadaraan hab dh-aqankooda ku saabsan nadaafada gacmaha oo ayna isticmaalin tuwaalka aad adigu isticmaasho.

Waxyaabaha aad gurigaaga ka hirgalin karto:

- U fiirsi nadaafada gacmaha- ku maydh gacmahaaga saabuun dareere ah inta aadan cunto karinin kahor, kahor cunto cunida iyo kadib isticmaalka musquusha.
- Ku dadaal nadaafada jidhkana maydho dhawr jeer todobaadkiiba oo maalin walba xidho dharka hoose oo nadiif ah.
- Iisticmaal tuwaalkaaaga oo kaliya oo si joogto ah isaga badal.

>>>

Waxyabaha ay sameeyaan Isbitaalada/Goobaha lagu gacan qabto dadka tabaalaysan

Waa lagu takoori/waxaad kaligaa joogi qol ay musquli kuugu dhax taalo inta aad ka shubmayso iyo labo cisho kadib marka uu kaa istaago shubanku. Mudadan, cuntada waxaa laguugu keeni qolkaaga. Ka feejignaw in aad ku maydho gacmahaaga saabuun iyo biyo kahor inta aadan cunin iyo kadib marka aad musqusha isticmaasho. Waa muhiim in aad ku dadaasho nadaafada wanaagsan oo aad maa-lin walba maydhato dharka hoosena si joogto ah isaga basho. Dadka ku soo booqanayaana waa in ay ku dadaalaan nadaafada gacmaha kahor iyo kadib marka ay ku soo booqdaan. Waxaa loo ogolaan in ay booqdaan qolkaaga oo kaliya loomana ogolaan doonoqolalka kale ee waadhka.

**Ring 1177 for health care advice in English/Swedish
or visit www.1177.se/Halland/other-languages**